


Barnaamijka Gaadiidka

La Awoodi Karo

Affordable Transit Program (ATP)



Baro sida looga kaydsato
kharashka gaari-raaca ee GRT

Haddii uu ku soo galo dakhli hooseeya oo aad ku nooshahay Gobolka Waterloo waxaad u qalmi kartaa Barnaamijka Gaadiidka La Awoodi Karo (ATP).

Barnaamijka ATP wuxuu qiimo-dhimis ku sameeyaa qiimaha kharashka gaari-raaca GRT, booqo grt.ca/fares si aad faahfaahin u hesho.

Baddeecada Gaari-raaca

Kaarka gaari-raaca ee billaha ah

Lacag-bixinta qiimaha kaydsan

Tigidhada MobilityPLUS ATP (5 xirimo)

Yaa codsan kara?

Qof kasta oo jira 18 ama ka weyn ayaa codsan kara ATP. U qalmida barnaamijka ayaa lagu saleeyaa dakhliga saafiga ah ee qoyskaaga (khadka 23600 ee cashuur-celinta xubin kasta), waxaa ku jira lammaanahaaga, iyo dadka kugu tiirsan ee jira 18 ama ka weyn ee jooga gurigaaga. Haddii la oggolaado, dhammaan xubnaha qoyskaaga waxay heli karaan qiimo-dhimista ATP, oo ay ku jiraan kuwa jira 17 ama ka yar. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan tirada qoyska iyo xadka dakhliga, fadlan booqo grt.ca/ATP.

U qalmida barnaamijka ATP waxaa maamula Department of Community Services ee Gobolka Waterloo.

Haddii aad tahay 17 jir ama ka yar, oo aad dhaqaale ahaan tahay mid madax banaan, fadlan la xirii shaqaalaha kiiskaaga ama Community Services si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

Ardayda wakhtiga buuxa ee dugsiga sare dhammaysay uma qalmaan Barnaamijka Gadiidka La Awoodi Karo (ATP).



Sideen u codsadaa?

- Onlayn ka codso barta grt.ca/ATP
- Shaqsi ahaan u tag **Community Services Welcome Centres**, furan Isniin Illaa Jimce laga bilaabo 9 subaxnimo. illaa 4:30 galabnimo.
 - 99 Regina Street South, Waterloo
 - 20 Weber Street East, Kitchener
 - 150 Main Street, Cambridge

Haddii aad qabto su'aalo wac 519-883-2100 xiriirinta. 2, Isniin illaa Jimce laga bilaabo 9 subaxnimo. 3 galabnimo.

Maxaa la iiga baahan yahay si aan u codsado?

Waxaa lagaaga baahan doonaa inaad keento caddaynta cinwaanka guriga iyo dakhliga qoyskaaga. Waad awoodaa inaad ka samayso onlaynka ama shaqsi ahaan u tagto xarumaha Community Services Welcome Centres. Si aad hesho macluumaadkii ugu dambeeyay ee ku saabsan waxa lagaaga baahan yahay si aad u codsato iyo dukumentiyada la aqbal, fadlan booqo grt.ca/ATP.

Waa maxay dukumeentiyada la aqbal?

Caddaynta Cinwaanka Guirga (mid ka mid ah kuwan soo socda)

- Shatiga darawalinimada oo Sax ah
- Biilka tamarta ee ugu dambeeyay
- Kaarka Aqoonsiga ee sawirka leh ee Ontario
- Risiidhka ijaarka ama kirada
- Boosada ay dawladdu bixisay
- Dukumeentiga amaahda guriga

Caddeynta Dakhliga

(mid ka mid ah kuwan soo socda ee qof kasta oo qoyskaaga ka tirsan ee jira 18 ama ka weyn).

- Ogeysiiska Qiimaynta ee Canada Revenue Agency
- Warqad ka timid Shaqaalaha Bulshada oo Diiwaangashan
- Caddaynta bayaanka dakhliga CRA (Xulashada C)

Haddii aad Kanada ku cusub tahay sannadka hadda socda, waxaad soo gudbin kartaa mid ka mid ah kuwan soo socda:

- PR ama kaarka dhalashada
- Ogolaanshaha shaqada
- Dukumeentiga ilaalinta qaxootiga
- Xaqiiqinta deganaanshaha rasmiga ah
- Xaqiiqinta sheegashada

Haddii aad tahay arday hore:

Haddii aad ahayd arday sannadkii u dambeeyay, waxaa lagaaga baahan doonaa inaad keento caddaynta dukumentiyada dhamaystirka/qalin-jabinta.

Maxaa dhacaya haddii aan hore u helay kaalmada bulshada?

Macaamiisha Ontario Works iyo Ontario Disability Support Program (Barnaamijka Taageerada Naafada Ontario) ayaa la waydiin doonaa:

- Taariikhda Dhalashada
- Aqoonsiga Xubinta SAMS ama Lambarka Caymiska Bulshada

Sideen ku ogaan karaa in codsigayga la ansixiyay?

Waxa lagugu soo ogeysiin doonaa iimayl, qoraal ama telefoon ahaan ku dhawaad toddoba maalmood gudahooda kadib codsigaaga.

U qalmida waxay socotaa hal sano. Codsadayaashu waa inay dib-u-codsadaan 30 maalmood ka hor inta kaadhkoodu dhicin si ay ugu sii jiraan barnaamijka.



GRT

GRAND RIVER TRANSIT

Haddii aad su'aalo qabto

Fadlan ka wac Community Services lambarka 519-883-2100
lambarka xiriirinta 2.

Saacadaha: 9 subaxnimo - 3 galabnimo, Isniin - Jimco.

Dhagoolaha iyo Dadka Maqalka Culus (TTY)
519-575-4608

grt.ca



Region of Waterloo